

## Waraqaha soo socda ayaad u baahantahay/baahantihiin in aad soo gudbisaan mar kasta oo taageero masruuf la codsanayo:

**Codsigi bishan la soo gudbiyo wuxuu khuseeya bisha soo socota.**  
(Tusaale ahaan: codsiga taageerada masruufka ee Jannaayo 2021 waxaa la soo gudbinayaa Diseembar 2020.)

- **Warbixin kooban oo akoonka ku saabsan**, oo laga keenayo dhammaan bangiyada aad akoomanka ku leedihiid.
- **Qoraal laga soo saaray akoonnada**, oo ah 3 bilood ee ugu dambeeyay oo laga keenayo **dhammaan** akoonnada bangiyada aad koontooyinka ku leedahay **dhammaantood**. Taasi xitaa wey khuseysaa akoomanki la xiray.
- **Faahfaahinno** ku saabsan dhammaan dakhligaaga tusaale ahaan faahfaahinta mushaarka, lacagaha kaaga yimaada Qasnadda ceymiska iyo qasnadda ceymiska shaqa la'aanta oo ah seddaxdi bilood ee la soo dhaafay.
- **Sanduuqyada maaliyadda/Saamiyada lacageed**: Liis iyagaas ku saabsan seddax bilood oo la soo dhaafay. Waxay xitaa wey khuseysaa akoomanki la xiray.
- **Caddeyta dakhliga ama caddeyn ku saabsan caddeynta dakhliga**, bogga oo dhan. Si aad macluumaad dheeraad ah uga heshid caddeyntaada dakhliga, kala xiriir Laanta Canshuuraha 0771-567 567.
- **Go'aan** ka socda Xafiiska shaqada, Qasnadda ceymiska shaqo la'aanta, A-kassa, CSN haddii uu jiryo.
- **Xafiiska shaqada**, qorshe iminka taagan haddii aad shaqo raadis tahay.
- **Kontoraatada guriga** iyo faaturada kirada oo dhammeystiran.
- **Kontoraatada gacan labaadka ama la deggenaashada ah** oo uu ay la socoto faaturada kirada iyo rasiidki aad bishii ugu dambeysay kirada ku bixisay.
- **Hoy xaq lahaansho ah ama guri aad adigu leedihiid**: Warqadda iibsashada, macluumaadka deynta, dul saarka, lacag iska yar-yareynta iyo lacaga khidmada ah ee tusaale ahaan jaaliyadda.
- **Caddeyn dhakhtar**, haddii aad jirro ku qorantihid.
- **Caddeyn waxbarasho- iyo shaqo**, haddii aad waxbaratid ama shaqeysid.



- Go'aanka sharciga **degganaashada** ee Laanta socdaalka.
- **Faatuuro/waxa ay ku saleysanyihiin kharashaadka** aad rabtid in laga bixiyo, tusaale ahaan faatuurooyinka korontada, kirada, ceymiska guriga, ururka shaqaalaha, xannaannada carruurta iwm. **FG!** Bogagga faatuurada oo dhan keen.
- Haddii la codsanayo **kharashaad caafimaad** waa in la keenaa faahfaahinta warqad dawo oo uu dhakhtar qoryay.